



Qorshaha Samatabixinta Maraykanka (American Rescue Plan) Waxa uu hoos u dhigaa qiimaha Caymiska Caafimaadka dadka degan New York

NY State of Health waxa uu kaa caawin karaa inaad fahanto kaalmada dhaqaalaha ee cusub, aadna cusbooneysiiso cadadka amaahdaada canshuurta, iyo inaad wax ku iibsato iyo sidoo kale inaad doorato qorshe caafimaad.

La xariir Laanta NY State of Health



Oonleen ahaan ugala xariir:
nystateofhealth.ny.gov



Wac Xarunta Adeega Macmiilka oo lambarkoodu yahay:
1-855-355-5777
(TTY:1-800-662-1220)



Caawimaad bilaash ah ka hel Caawiyaha Isdiiwangelinta. Ka raadi mid: info.nystateofhealth.ny.gov/findassistor

Fahanka Kaalmada Dhaqaale ee Cusub

- American Rescue Plan waxaa la saxiixay oo sharciga la marsiiyay Maarso 11, 2021. Waxaa kamid ah kaalmo dhaqaale oo cusub sidoo kalena balaaran oo la siinaayo dadka reer New York ee ka diiwaangashan caymiska caafimaadka ee lagu bixiyo NY State of Health.
- Kaalmadaan dhaqaale waxaa hadda heli kara **dadka horey oga diiwaangashanaa iyo kuwa hadda iska diiwaangelinaaya**, oo ay kujiraan **dadka dakhligooda aadka u sareeyo markii ugu horeysay**.
- Fiiro gaar ah u yeelo ogeysiisyada iyo iimeelada ay soodirto laanta NY State of Health oo ay kugula socod siinayso waxa ay tahay inaad sameyso.
- Si aad wax badan oga barato American Rescue Plan, fadlan booqo: <https://info.nystateofhealth.ny.gov/AmericanRescuePlan>

NY State of Health waxay u hoggaansantaa sharciyada xuquuqaha madaniga Federaaliga ee lagu dabihi karo iyo sharciyada gobolka, waxna kuma takoorto qaababka isirka, midabka, asalka qaranka, caqiidada/diinta, sinjiga, da'da, heerka guurka/qoyska, naafada, diiwaanka xabsiga lagu qaatay, dembi kuhelida falka dambi, aqoonsiga sinjiga, qaabka galmada, sifooyinka u nuglaanshaha hidda sidaha, heerka guurka, xaalada dhibanaha gabood falka guriga iyo/ama aargoosiga.

American Rescue Plan

Waxa uu hoos u dhigaa Caymiska Caafimaadka dadka reer New York

Waxa ay tahay Inaad Sameyso:

Haddii aad horey iskaga diiwaangelisay qorshaha adoo u maray NY State of Health aadna heshay kaalmo dhaqaale:

- Waxaad hadda u qalantaa kaalmo dhaqaale oo dheeraad ah.
- NY State of Health waxay kusoo dirtay waraaqa billoowga abriil oo ay ku qoran yihiin qiimaha dhibcaha canshuurta cusub, oo balaaran.
- NY State of Health ayaa si ootomaatig ah u kordhisay cadadka qiimo dhimistaada canshuurta. Waxaad samayn kartaa isbadel adoo gelaaya akoonkaaga NY State of Health, la xariir qofka kaa caawinaaya isdiiwaangelinta, ama wac 1-855-355-5777.

Haddii aad billoowday codsiga NY State of Health laakiin aadan iska diiwaangelin qorshaha caafimaadka:

- Haddii lagu sheegay inaad u qalanto kaalmada dhaqaalaha, hadda waxay u badan tahay inaad heli doonto kaalmo dheeraad ah. Hadda dib u gal akoonkaaga NY State of Health kadibna fiiri inaad u qalanto canshuur celin badan, kadibna u adeego oo dooro qorshe.
- Haddii horay laguugu sheegay inaadan u qalmin caawimaad dhaqaale, NY State of Health ayaa kuusoo diri karta dhawaan ogaysiis cusub oo kuu sheegaaya inaad u qalanto. Dib u gal akoonkaaga NY State of Health kadibna fiiri inaad u qalanto canshuur celin badan, kadibna u adeego oo dooro qorshe.

Haddii aad mar horeba ka diiwaangashan tahay qorshaha NY State of Health aadana helin kaalmo dhaqaale:

- Waxaad hadda u qalmi kartaa dhibco canshuur celin oo aad u balaaran.
- Haddii aad u qalanto, NY State of Health waxay kuusoo diri doontaa warqad ay kuugu sheegayso qiimaha dhibcaha canshuur celintaada. Macluumaad ku saabsan sida loo codsado dhibcaha canshuur ka dhaafitaanka waxaa laga heli doonaa <https://info.nystateofhealth.ny.gov/AmericanRescuePlan>

Haddii aadan horey iskaga diiwaangelin qorshaha adoo u maraaya NY State of Health aadana bilaabin codsi:

- Hadda ka codso nystateofhealth.ny.gov si aad u hesho waxa aad u qalanto.
- Inta badan dadka reer New York waxay u qalmaan caymis bilaasha h ama qiimo jaban.